WAAXDA XAAFADAHA SEATTLE

ILAALINTA TAARIIKHIGA

Barnaamijka Ilaalinta Taariikhiga waxa uu mas'uul ka yahay doorashada iyo ilaalinta in kabdan 400 oo dhismayaal, goobo, shayo iyo maraakiib taariikhi ah, sidoo kale siddeedda degmo ee taariikha ah ee Seattle. Iyadoo laga qaybgaliyo degganayaasha dayactirka heerka sare ah ee dib-u-dejinta iyo dhismayaasha cusub , barnaamijku waxa uu u aqoonsadaa oo ilaaliyaa tayada, astaanta, iyo gaar ahanshaha xaafadooda.

Pioneer Square Pergola

U kaydinta Wixii Hore Mustaqbalka

Ka go'naanta Seattle ilaalinta taariikhiga ah waxa bilaabay muwaadiniinta 1960-kii si ay u joojiyaan duminta dhismayaal dhawr ah oo la jecelyahay oo waxay soo jeediyeen qorshayaasha "Dib u cusboonaysiinta Magaalada" taas oo dumin lahayn inta ugu badan badhtamaha magaalada ee Pioneer Square iyo Pike Place Market. 1970-kii, Golaha deegaanka Magaalada Seattle waxay xaqiijiyaan badbaadada Pioneer Square oo ay la socdaan ilaalinta dagmada taariikhiga ah ee ugu horaysay Magaalada, oo waxay u codeeyeen ansixinta abuuridda Pike Place Market ee Dagamada Taariikhiga ah laba sano ka dib.

1973-kii, Golaha deegaanka Magaalada Seattle waxay ansixiyeen Sharciga Ilaalinta Astaamaha dulka si loo ilaaliyo guryaha taariikhiga ah iyo Naqshadaha muhiimka ah ee ku xeersan magaalada — oo in kabadan 400 dhismayaal iyo goobo ayaa loo qoondeeyay in lagu cabiro laga bilaabo Ward House, guryeheena ugu da'da weyn ee taagan, ilaa dhismaha casriga ah ee Space Needle.

Degmooyin Taariikhi ah

Ilaa 1970, Seattle waxay aasaastay siddeed degmo oo taariikhi ah. degmo kasta oo taariikhi ahi waxay leedahay guddida dib-u-eegista muwaadiniinta, guddi, ama komishan ka shaqeeya Barnaamijka Ilaalinta Taariikha ah. waxay u kulmaansi ay u darsaan isbeddelada ku imanaya guryaha taariikhiga ah iyo si ay u hubsadaan isbeddeladu inay dhawraan naqshadaha iyo hufnaanta taariikhiga ah ee guryaha iyo goobaha caanka ah iyadoo loo eegayo hannaanka iyo shuruudaha ay aas aastay qaanuunka magaaloweyntu. Halkan wa ah degmooyinka taariikhiga ah:

- Ballard Avene
- Columbia City
- Fort Lawton
- Harvard-Belmont
- International District
- Pike Place Market
- Pioneer Square
- Sand Point Naval Air Station

Credit: Krafft & Krafft

Astaanta Degmada Ballard Avenue

Guddida Ilaalinta Astaanta dulku waxay kormeeraan qaanuunka magaalada ee dhismayaasha taariikhiga ah, goobaha iyo shayada.

Seattle Department of NeighborhoodS

HISTORIC PRESERVATION

Waaxda Xaafadaha Seattle

BARNAAMIJKA ILAALINTA TAARIIKHIGA AH

Boggayaga Internetka — oo ah Goobta Loo Tago Dhammaan Waxa Walaba oo Ilaalinta Ah

Union Stables (Credit: Lara Swimmer)

Boggayaga internetka ayaa u adeega ahaan marin lagu ogaado shaqadada xiisaha badan ee muhiim ah ee xafididda dhaxalgalka taariikhda ah ee hodanka ah ee hantida farshaxaneed ee loogu talogalay jiilka hadda iyo jiilka mustaqbalka. Waxa loo aasaasay in lagu tilmaamo dadka degan, ganacsatada, mulkiilayaasha guryaha, farshaxaniistaha, qorsheeyayaasha, iyo muwaadiniinta kale ee xiisaynaya iyagoo umaraya nidaamka sharciga Seattle kaas oo xukuma si gooniya astaamaha dhulka iyo degmooyinka taariikhiga ah. waxa uu sidoo kale bixiyaa:

- Guudmarka ilaalinta taariikhiga ah Dhiirigelinaha mulkiilayaasha guryaha
- Macluumaad ku saabsan magaaladda siddeedeeda degmo ee taariikhiga ah, oo ay ku jiraan ajandayaasha kulamada iyo waxa ka soo baxa kulamada degmo kasta
- Isku-xidhyada deegaanada iyo khayraadka qaran ee danaha taariikhiga ah
- Liiska astaamaha dulka eee la qoondeeyay

Sahanka Khayraadka Taariikhiga ah

2000, magaalada Seattle waxay bilawday dadaal habaysan oo dhammaystiran si ay u sahamiso oo ay u tirikoobto khayraadadeeda taariikhiga ah. Khabiiro farshaxaniiste taariikhyahano iyo tabarucayaal ayaa sahamiyay oo tirakoobay in ka badan 8,500 oo guri magaalada oo dhan, oo ay ku jiraan demooyinka ganacsi ee jaarku, dadka degan guryahani waxay dhisteen kahor 1906, oo magaaladu waa khayraadyo ay magaaladu leedahay. Hadda waxay ku jiraan database online-ah oo ay ka heli karaan dadweynuhu boggeena internetka.

Waxbarashada iyo Gacan siiinta

Barnaamijka Ilaalinta Taariikhiga ahi waxa uu bixiyaaa waxbarashda degmada iyo gacan siinta shaqsiyada iyo kooxaha dadaynaya nidaamka magacaabidda astaamaha dulka iyo si guud u ilaalinta taariikhiga ah:

- Mashaariicda Sahanka iyo Tirikoobka
- Gacan siinta kooxaha bulshadda
- Gacansiinta fool ka fool ah ee la siiyo shaqsiyaadka mulkiilayaasha hantida

Gaslight Inn

MACLUUMADKA LAGALA XIDHIIDHO:

Barnaamijka Ilaalinta Taariikhiga ah
Waaxda Xaafadaha Seattle

Telefoon: (206) 684-0228
Bogga Internet-ka:
www.seattle.gov/neighborhoods/preservation/

2015_12_31: SO